



Australian Government



Ka dib tallaalkaaga Comirnaty (Pfizer) COVID- 19

Markii ugu dambeysey ee la cusbooneysiisay: 18 Ogost 2021

Ku saabsan tallaalka

Maanta waxaad heshay **tallaalka Comirnaty (Pfizer Australia Pty Ltd)**.

Tallaalkan wuxuu ka hortagi karaa dadka inay ku bukoodaan COVID-19. Pfizer kuma jiraan fayras nool, kumana siin karo COVID-19. Waxay ka kooban tahay koodhka hidda-wadaha ee qayb muhiim ah oo ka mid ah fayraska SARS-CoV-2 ee loo yaqaan borotiinka soo kordhay (spike protein). Tallaalka ka dib, jidhkaagu wuxuu sameeyaa nuqullo borotiinka kor u kaca ah (spike protein), Nidaamkaaga difaaca jidhka ayaa markaa baran doona inuu aqoonsado lana dagaallamo fayraska SARS-CoV-2. Jidhka ayaa si dhakhso jajabiya xeerka hidda-sidaha ayaa ah u.

Maxaa laga filan karaa tallaalka ka dib

Sida tallaalka kasta, waxaad yeelan kartaa xoogaa saameyn ah kadib markaad heshid tallaalka COVID-19.

Saameynaha caadiga ah ee ka dambeeya **Pfizer** waxaa ka mid ah:

- xanuun ama barar goobta laga muddey
- daallanaan
- madax xanuun
- murqo xanuun
- xumad iyo qadhqadhyo
- xanuun kalagoosyada.

Waxyellooyin yar ee caadiga ah ka dib **Pfizer** waxaa ka mid ah:

- casaan goobta la mudey
- lallabbo
- qanjidhada oo barara
- dareemid caafimaad darro

- xanuun addimada ah
- hurdo la'aan
- cuncun goobta la mudey.

Dhibaatooyinkan soo noqnoqda badanaa waa kuwo fudud oo badiyaa waxay ku baaba'aan hal ama laba maalmood gudahood. Qaar ka mid ah dadka qaata waxay la kulmi doonaan calaamado dureyga oo kale ah oo muhiim ah tallaalkan marka la barbar dhigo tallaallada kale ee caadiga ah iyo. Inta udhaxeysa hal qof 4tii ilaa 20 qof ee wax qaata waxay u baahan karaan waqti ka fog howlaha caadiga ah. Astaamahan ayaa dhici kara ka dib marka ay qaataan qaybta koowaad ama labaad laakiin waxay aad ugu badan yihiin qaybta koowaad ka dib.

Haddii aad isku aragtid xanuun meesha lagaa mudey ama xumad, madax xanuun ama jidhka oo xanuuna tallaalka ka dib, waxaad qaadan kartaa paracetamol ama ibuprofen. Kuwani waxay kaa caawinayaan yareynta qaar ka mid ah astaamaha kor ku xusan (uma baahnid inaad qaadatid paracetamol ama ibuprofen ka hor tallaalka). Haddii barar ka jiro goobta lagaa mudey, waxaad isticmaali kartaa cadaadin qabow.

Dhibaatooyinka dhifka ah ee la soo sheegay ka dib Pfizer waa:

- Dareen-celin xasaasiyadeed oo daran (anafilasowis, anaphylaxis)
- myocarditis iyo pericarditis. Kiisaska la soo sheegay badidoodu waxay ahaayeen kuwo khafiif ah, is-xakameyn iyo degdeg loo soo kabsado, in kasta oo dabagalka muddada dheer ee kiisaskani uu socdo. Kiisaska ayaa la soo sheegay badiyaa kadib dhooska labaad iyo inta badan ragga da'da yar (da'doodu tahay < 30 sano).

Waa inaad raadsataa daryeel caafimaad tallaalka kadib haddii:

- aad u maleyneysid inaad leedahay xasaasiyad falcelis ah. Wac 000 haddii aad isku aragtid astaamo daran, sida neefsashada oo kugu adkaata, xiiq, xoog u garaac wadnaha ah ama dhicitaan
- qabtid laab xanuun, cadaadis ama raaxo -darro, garaaca wadnaha oo aan joogto ahayn, garaacis ka booday ama 'gariirid', miyir beelid, neefta oo ku qabata ama xanuun xagga neefsashada ah
- aad ka walwalaysaa waxyeellooyin soo raaca ama aad yeelatid calaamado cusub ama lama filaan ah
- aad leedahay waxyeellooyin laga filayo tallaalka oo aan dhammaan maalmo kadib.

Calaamadaha aan degdegga ahayn, waxaad u tagi kartaa bixiyahaaga daryeelka caafimaad ee caadiga ah (badanaa GP-gaaga).

La socodka badbaadada tallaalka iyo ka warbixinta dhibaatooyinka soo raaca

Waad ku soo wargelin kartaa bixiyaha tallaalkaaga ama xirfadle daryeel caafimaad kale waxyeelo aad ka shakidey in ay kaa soo gaadheen tallaalkaaga. Kadib waxay ka sameyn doonaan warbixin rasmi ah iyagoo ku matalaya waaxdaada caafimaadka ee gobolka ama taritoriga ama si toos ah Maamulka Alaabta Daaweynta (Therapeutic Goods Administration TGA).

Haddii aad doorbideysid inaad soo sheegtid naftaada, fadlan [boogowarbixinada waxyeellooyin lala xidhinayo COVID 19 a bogga tallaalka COVID-19](#).

Baadhitaanka COVID-19 tallaalka kadib

Dhibaatooyinka qaarkood ee ka imanaya tallaalka COVID-19 waxay la mid noqon karaan astaamaha COVID-19 (tusaale, xumad), Si kastaba ha noqotee, Pfizer kuma jiraan fayras nool mana sababi karo COVID-19. Waxaa laga yaabaa inaad u baahnayn inaad heshid baaritaanka COVID-19 ama go'doomin:

- haddii aad isku aragtid astaamo guud sida xumad, madax xanuun ama daal labada maalmood ee ugu horreysa tallaalka ka dib, iyo
- haddii aad hubtid inaad lahayn wax calaamado neefsasho ah (tusaale sanko oo dareera, qufac, cuna xanuun, ur ur ama dhadhan la'aan).

Si kastaba ha noqotee, waa inaad hubisaa tilmaamaha hadda jira ee gobolkaaga / taritorigaaga si aad u heshid macluumaadka ugu dambeeyay. Taladan waa la beddeli karaa haddii ay dhacdo in COVID-19 uu ka dillaaco agagaarka. Waxaad weli u baahan kartaa inaad heshid baadhitaanka COVID-19 haddii aad la kulantid shuruudo kale, tusaale ahaan. tusaale ahaan haddii aad xidhiidh dhow la leedahay kiiska la yaqaan ee COVID-19. Haddii aad shaki ka qabtid, raadso qiimeyn caafimaad.

Xusuusnow ballantaada labaad

Waa muhiim inaad heshid laba dhoos oo ah Pfizer tallaalka COVID-19. Labadan dhoos ayaa intabadan loo dhaxeysiiyaa 3-6 wiig, lakiin muddo intaa ka dheer ayaa lagu talinkaraa xaaladaha qaarkood. Dhooskalabaad waxay u egtahay inay sii dheereyn doonto muddada kahortaga COVID-19.

Sidee loo adeegsadaa macluumaadka aad ku bixisid ballantaada

Wixii macluumaad ah ee ku saabsan sida macluumaadkaaga shakhsiyeed loo ururiyo, loo kaydiyo loona istcimaalo booqo <https://www.health.gov.au/using-our-websites/privacy/privacy-notice-for-covid-19-vaccinations>